Waa inaad ku darto nuqul ah cashuur celintaadii federaalka ee ugu dambeysay, oo ay ka mid yihiin foomamka, jadwallada, iyo kordhinada. Haddii uu yahay ganacsi cusub oo aanad weli xareyn cashuuro, waxa aad ku dartaa diiwaanada dakhliga iyo kharashaadka illaa hadda.

Uga jawaab qaybtan qofkasta oo kamid ah qoyskaaga, oo ay kamid yihiin carruurtu.

STIN

Ajawaabta:

## 33. Miyaa qofna dakhli ka soo galaa daraasad shaqeed, deeq arday, ama deyn?

☐ **HAA.** Ka jawaab su'aashan ☐ **MAYA.** U bood su'aasha xigta

| Magaca koowaad, xarafka u horreeya magaca aabbaha | Xaddiga deeqda ama deynta | Xaddiga kharashka waxdhigashada iyo kharashyada kale ee dugsiga/jaamacadda | Muddada la bixiyey (bisha/sannadka - bisha/sannadka) |
|---|---|---|---|
| | $ | $ | |
| | $ | $ | |

UNEA

Ajawaabta:

## 34. Qofna dakhli ma ka soo galaa wax khayraad ah oo kale, sida kuwa ku qoran hoos?

☐ **HAA.** Ka jawaab su'aashan ☐ **MAYA.** U bood su'aasha xigta

Calaamadi noocyada dhakhliga la helo kuna faahfaahi halka hoose. Waxa aad qortaa dakhliga guud (dakhliga kahor inta aan wax lagaa jarin, sida kharashyada caymiska Medicare, cashuuraha, caymiska, masruufka ilmaha iyo kharashyada midawyada).

- ☐ Masruufka xaaska
- ☐ Masruufka ilmaha
- ☐ Saami qaybsiga ama dulsaarka
- ☐ Heshiisyada caymiska
- ☐ Shaqo la'aanta
- ☐ Lacagta laga helo dadka kale
- ☐ Hawlgabka bishii wax lagu daro ama hawlgabka (pensions or retirement)
- ☐ Qoraalka ballanqaadka bixinta deynta/deynta guriga
- ☐ Sooshal Sekeyuuritiga
- ☐ SSI/AABD
- ☐ Trusts ama macaashyada saamiyada (annuities)
- ☐ Gunnooyinka ciidanka hore
- ☐ Magdhawga shaqaalaha
- ☐ Waxkale (ku sharrax hoos)

| Magaca koowaad, xarafka u horreeya magaca aabbaha | Nooca dakhliga | Dakhliga guud inta aan waxba laga jarin | Lagu qaato naafanimo? |
|---|---|---|---|
| | | $ kasta | ☐ Haa ☐ Maya |
| | | $ kasta | ☐ Haa ☐ Maya |
| | | $ kasta | ☐ Haa ☐ Maya |
| | | $ kasta | ☐ Haa ☐ Maya |
| | | $ kasta | ☐ Haa ☐ Maya |

Ajawaabta:

## 35. Haddii aanad lahayn wax dakhli ah, sidee baad u bixisaa kharashaadka nolosha ee maalinlaha ah?

Ku sharrax hoos.

| |
|---|
| |
| |
| |
| |

# Kharashaadka

Uga jawaab qaybtan qofkasta oo kamid ah qoyskaaga, oo ay kamid yihiin carruurtu. Kharashaadka la soo sheegay waxa ay gacan ka geysan karaan kordhinta gunnadaada 3SquaresVT. Kadib marka aad soo gudbiso arjigan, waxa aad kasoo warbixin kartaa kharashaadka cusub wakhti kasta.

DCEX

Ajawaabta:

## 36. Miyaa qofna bixiyaa masruuf ilme ama masruuf xaas?

☐ **HAA. Ka jawaab su'aashan** ☐ **MAYA. U bood su'aasha xigta**

| Magaca qofka bixinaya | | Xaddiga uu bixinayo | Imisa jeer baa la bixiyaa? | Ma maxkamad baa amartay? | Yaa la siiyaa qarashkan la bixiyo? (magac(yada) oo dhammaystiran) |
|---|---|---|---|---|---|
| | Masruufka xaaska | $ | | ☐ Haa ☐ Maya | |
| | Masruufka ilmaha | $ | | ☐ Haa ☐ Maya | |
| **Magaca qofka bixinaya** | | **Xaddiga uu bixinayo** | **Imisa jeer baa la bixiyaa?** | **Ma maxkamad baa amartay?** | **Yaa la siiyaa qarashkan la bixiyo? (magac(yada) oo dhammaystiran)** |
| | Masruufka xaaska | $ | | ☐ Haa ☐ Maya | |
| | Masruufka ilmaha | $ | | ☐ Haa ☐ Maya | |

DCEX

Ajawaabta:

## 37. Miyaa qofna adeegsadaa adeegyada daryeelka caruurta ama daryeelka qof weyn?

☐ **HAA. Ka jawaab su'aashan** ☐ **MAYA. U bood su'aasha xigta**

U qor ilme iyo qof weyn oo kasta si gaar ah.

| | | | |
|---|---|---|---|
| Ilmaha/qofka weyn ee la daryeelayo | Qofka bixinaya kharashka daryeelka | Magaca iyo cinwaanka daryeel bixiyaha ilmaha/qofka weyn | |
| Xaddiga la siinayo toddobaadkii, kadib kabka | Maylasha loo kala socdaalo guriga illaa daryeel bixiyaha (1-socdaal) | Maalmaha daryeelka ee toddobaadkii | Sababta daryeelka loogu baahan yahay: ☐ Dugsiga ☐ Shaqada ☐ Raadinta shaqada |
| Ilmaha/qofka weyn ee la daryeelayo | Qofka bixinaya kharashka daryeelka | Magaca iyo cinwaanka daryeel bixiyaha ilmaha/qofka weyn | |
| Xaddiga la siinayo toddobaadkii, kadib kabka | Maylasha loo kala socdaalo guriga illaa daryeel bixiyaha (1-socdaal) | Maalmaha daryeelka ee toddobaadkii | Sababta daryeelka loogu baahan yahay: ☐ Dugsiga ☐ Shaqada ☐ Raadinta shaqada |
| Ilmaha/qofka weyn ee la daryeelayo | Qofka bixinaya kharashka daryeelka | Magaca iyo cinwaanka daryeel bixiyaha ilmaha/qofka weyn | |
| Xaddiga la siinayo toddobaadkii, kadib kabka | Maylasha loo kala socdaalo guriga illaa daryeel bixiyaha (1-socdaal) | Maalmaha daryeelka ee toddobaadkii | Sababta daryeelka loogu baahan yahay: ☐ Dugsiga ☐ Shaqada ☐ Raadinta shaqada |

FMED

Ajawaabta:

## 38. Miyaa qof ah da'da 60 ama ka weyn ama naafo ahi ka bixiyaa wax ka badan $35 bishii jeebkiisa tanoo ah kharashaadka caafimaadka (aanu daboolayn caymis)?

Tusaaleyaal:

- Kharashyada (premiums) , kharash-wadaaga (copays), iyo ka jaritaanada (deductibles) caymiska caafimaadka;
- Kharash-wadaagga daawada dhakhtarku qoray;
- Kharashyada gaadiidka ee lagu doonanayo adeegyada ama daaweynta caafimaad;
- Biilalka adeegyada caafimaadka (sida, khabiir caafimaad, dhakhtar ilkood, daryeel isbitaal, daryeel kalkaalin, khabiir caafimaad maskaxeed, ama baxnaanin) iyo
- Daawooyinka dhakhtar la'aan la iibsado, qalabka, iyo agabyada (haddii uu ansixiyo khabiirkaaga caafimaad).

☐ **HAA. Ka jawaab su'aashan** ☐ **MAYA. U bood su'aasha xigta**

| Magaca koowaad, xarafka u horreeya magaca aabbaha | | Magaca koowaad, xarafka u horreeya magaca aabbaha | | Magaca koowaad, xarafka u horreeya magaca aabbaha | |
|---|---|---|---|---|---|
| 1 | | 2 | | 3 | |

Sheegashada kharashaadka caafimaad ee billaha ah waxa uu kordhin karaa gunnadaada 3SquaresVT. Si aad u aragto in kharashaadkaagu ay kaa dhigayaan mid u qalma gunno ta aad qaadato ka badan, waxa aanu kuu soo diri doonaa Foomka 120 oo loogu talo galay qof kasta oo ku qoran halkan. Waxa uu sharraxayaa sida loo sheegto kharashaadka iyo dukumintiyada aad soo gudbin karto si loo xaqiijiyo. Si laguugu soo diro foomka imika, waxa aad wacdaa **1-800-479-6151**, ama waxa aad booqataa **myBenefits.vt.gov** si aad u daabacato.

**Foomka 120 waajib uma aha ka hawlgelidda arjigaaga**

Uga jawaab qaybtan qofkasta oo kamid ah qoyskaaga, oo ay kamid yihiin carruurtu.

Haddii aad qol ka kiraysatay guri qof, waxa aad kaga jawaabtaa MAYA su'aalaha 39–44 waxaadna kaga jawaabtaa HAA su'aasha 45.

KIRADA

Ajawaabta:

## 39. Miyaa qofna (aad ku jirto adiga laftaadu) kiro ka bixisaa guriga aad ku nooshahay?

☐ **HAA. Ka jawaab su'aashan** ☐ **MAYA. U bood su'aasha xigta**

| | | | |
|---|---|---|---|
| | Wadarta kirada | $ kasta | |

| Yaa bixiya kirada? (magaca koowaad, xarafka u horreeya magaca aabbaha) | Xaddiga kirada ee qofkani bixiyo | Maxaa ku jira? | Nooca kaalmada kirada, haddii ay jirto |
|---|---|---|---|
| | $ kasta | ☐ Kulaylka<br>☐ Adeegyada | ☐ Hoyga dadweynaha<br>☐ Hoyga kiradiisa la kabo<br>☐ Qaybta 8 |
| | $ kasta | ☐ Kulaylka<br>☐ Adeegyada | ☐ Hoyga dadweynaha<br>☐ Hoyga kiradiisa la kabo<br>☐ Qaybta 8 |
| | $ kasta | ☐ Kulaylka<br>☐ Adeegyada | ☐ Hoyga dadweynaha<br>☐ Hoyga kiradiisa la kabo<br>☐ Qaybta 8 |
| Macluumaadka mulkiilaha | Magaca | | Lambarka taleefanka |
| Cinwaanka boostada mulkiilaha: | | | |

GURIGA

Ajawaabta:

## 40. Miyaa qofna bixiyaa kharashka deynta guriga, cashuur hantiyeed, kiro dhul, deynta lagu qaato qiimaha guriga (home equity loan), kharashyada guriga qayb ka ah dhisme, ama kharashyada kale ee guriga aad ku nooshahay?

☐ **HAA. Ka jawaab su'aashan** ☐ **MAYA. U bood su'aasha xigta**

| Nooca kharash bixinta | Magaca koowaad, xarafka u horreeya magaca aabbaha | Intee jeer baa kharashyada la bixiyaa? | Xaddiga |
|---|---|---|---|
| Deynta guriga oo keliya *(aanu la socon xaddiga carbuuntu)* | | | Raasamaalka / Dulsaarka<br>$ / $ |
| **Magaca\ Cinwaanka: Deymiyaha Deynta Guriga** | | | |
| Cashuurta Hantida **(WADARTA CASHUURTA)** | | | $ |
| Cashuurta Hantida **(KHARASHKA GOBOLKA)** | | | $ |
| Cashuurta Gobolka **(XADDIGA CASHUURTA LA LEEYAHAY)** | | | |
| **Magaca\ Cinwaanka: Xafiiska Magaalada ee Cashuurta Hantida** | | | |
| Kirada dhulka | | | $ |
| **Magaca\ Cinwaanka: Mulkiilaha Dhulka Kirada ah** | | | |
| Kharashyada adeegyada guriga | | | $ |
| **Magaca\ Cinwaanka: Mulkiilaha Kharashka Guriga Qayb Ka ah Dhisme** | | | |
| Deynta lagu qaato qiimaha guriga | | | Raasamaalka / Dulsaarka<br>$ / $ |

UTIL

Ajawaabta:

## 41. Kharashaadka guriga miyaa lagula bixiyaa?

☐ **HAA. Ka jawaab su'aashan** ☐ **MAYA. U bood su'aasha xigta**

| Magaca qofka aad wada bixisaan kharashaadka | Waa kuwee kharashaadka aad wada bixisaan? |
|---|---|
| | ☐ Deyn guri ☐ Kirada ☐ Cashuuraha ☐ Adeegyada ☐ Waxkale |
| | ☐ Deyn guri ☐ Kirada ☐ Cashuuraha ☐ Adeegyada ☐ Waxkale |

Uga jawaab qaybtan qofkasta oo kamid ah qoyskaaga, oo ay kamid yihiin carruurtu.

UTIL

Ajawaabta:

## 42. Waxa aad wax nooga sheegtaa macluumaadkaaga guriga, kuleylinta, shidaalka iyo adeegga guriga.

| Magaca qofka bixiya | Dooro dhammaan inta habboon |
|---|---|
| | ☐ Kulaylka ☐ Biyaha kulul ☐ Karinta ☐ Laambadaha ☐ Qaboojiyaha |
| | ☐ Kulaylka ☐ Biyaha kulul ☐ Karinta ☐ Laambadaha ☐ Qaboojiyaha |

| | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|
| Nooca shidaalka ee BADANAA loo adeegsado in lagu kulayliyo gurigaaga (calaamadi keliya hal mid) | ☐ Dhuxul dhagaxda | ☐ Kerosene | ☐ Saliidda | ☐ Gaasta propane-ta | ☐ Waxkale: |
| | ☐ Korontada | ☐ Gaasta dabiiciga ah | ☐ Pellets | ☐ Xaabada | ______ |

| | | |
|---|---|---|
| Akawnka shidaalka iyo iibiyaha (haddii aad wax ku kulayliso xaabo, pellets ama kulaylintu ku jirto kiradaada, ka bood qaybtan) | Magaca ku qoran akownka | Lambarka akownka |
| | Magaca iibiyaha shidaalka | Lambarka taleefanka iibiyaha shidaalka ( ) – |
| | Cinwaanka iibiyaha shidaalka | |

| | | | |
|---|---|---|---|
| Bixiyaha korontada qoyska | Bixiyaha korontada | Magaca ku qoran akownka | Lambarka akownka |

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| Nooca guriga | ☐ Apartment | ☐ Hoy la'aan | ☐ Guri guurguura | ☐ Guri qoys-keliya |
| | ☐ Waxkale: | | Tirada qolalka hurdada | |

TALEEFANKA

Ajawaabta:

## 43. Miyaa qofna bixiyaa kharash si uu u helo taleefan?

☐ **HAA. Ka jawaab su'aashan** ☐ **MAYA. U bood su'aasha xigta**

| Magaca koowaad, xarafka u horreeya magaca aabbaha | | Magaca koowaad, xarafka u horreeya magaca aabbaha | | Magaca koowaad, xarafka u horreeya magaca aabbaha | |
|---|---|---|---|---|---|
| 1 | | 2 | | 3 | |

TALEEFANKA

Ajawaabta:

## 44. Miyaa qofna bixiyaa kharashka caymiska mulkiilaha ee gurigaaga? Tan kuma jirto caymiska kiraystayaasha.

Haddii caymiskaagu daboolo beddelka dhismayaasha gaarka ah iyo hantida shakhsiyeed, xaddigaas qayb kama aha kharashka caymiska mulkiilayaasha.

☐ **HAA. Ka jawaab su'aashan** ☐ **MAYA. U bood su'aasha xigta**

| Magaca koowaad, xarafka u horreeya magaca aabbaha | Xaddiga uu bixinayo | Imisa jeer baa la bixiyaa? |
|---|---|---|
| | $ | |
| Magaca & cinwaanka shirkadda caymiska | | |

RBEX

Ajawaabta:

## 45. Miyaa qofna bixiyaa kharashka kirada qol ku yaalla guri qof kale (oo ay la socoto ama aanay la socon cuntooyinku)?

☐ **HAA. Ka jawaab su'aashan** ☐ **MAYA. U bood su'aasha xigta**

| Magaca koowaad, xarafka u horreeya magaca aabbaha | Xaddiga uu bixinayo | Imisa jeer baa la bixiyaa? | Cuntooyinka maalintii ay ku jiraan |
|---|---|---|---|
| | $ | | |
| Magaca & cinwaanka mulkiilaha | | | |

# Bogga Saxeexa

**MIYAA QOF KALE KU METELAA?** Haddii aanad awood u lahayn, wakiil ayaa saxeexi kara arjigan, nala wadaagi kara macluumaadka, oo kugu meteli kara arrimaha la xidhiidha arjigaaga iyo gunnooyinkaaga. Wakiilku waxa uu noqon karaa:

- Wakiil sharci ahaan la magacaabay, sida masuul sharci ah ama qof leh awood qareen; ama
- Qof loogu magacaabay in uu yahay "Wakiilkaaga Igman" Foomka 139REP. Si aad u hesho foomka, waxa aad wacdaa **1-800-479-6151** ama waxa aad booqataa **myBenefits.vt.gov** si aad uga daabacato nuqul.

Haddii aad leedahay wakiil, waxa aad ku magacawdaa hoos waxaana aad ku dartaa caddeyn (sida, amar maxkamadeed, foomka awood qareen, Foomka 139REP, iwm.). **Caddeyn la'aanteed isma weydaarsan karno wax macluumaad ah qofkan ama saxeexooga hoose ma aqbali karno.**

| Nooca Wakaaladda: ☐ Wakiilka Igman ☐ Awoodda Qareen ☐ Masuulka Sharciga ah | |
|---|---|
| Magaca koowaad, ka aabbaha, ka awoowga | Lambarka taleefanka lagaala soo xidhiidhi karo<br>(   )   – |
| Cinwaanka boostada: waddada, magaalada, gobolka, zip code-ka | |

**MIYAA QOF KU KAALMEEEYEY?** Haddii qof aan ka ahayn wakiil kaa kaalmeeyey arjigan, waxa aad buuxisaa qaybtan. Waxa aad siin kartaa ESD ogolaansho si loola wadaago macluumaad qofkan, balse kuuma saxeexi karo ama kuguma meteli karo arrimaha mustaqbalka.

| Magaca koowaad, ka aabbaha, ka awoowga / Magaca hay'adda | Lambarka taleefanka lagaala soo xidhiidhi karo<br>(   )   – |
|---|---|
| Cinwaanka boostada: waddada, magaalada, gobolka, zip code-ka | |

☐ Waxa aan ogolaansho siinayaa ESD si ay ula wadaagto macluumaadka ku saabsan arjigayga iyo u qalmitaankayga qofkan. Waxa aan ogsoonahay in:

- Aanan ku qabsaneyn in aan bixiyo ogolaanshahan; inaanay saameyn ku lahayn u qalmitaankayga.
- ESD masuul kama aha waxa ku dhaca macluumaadka kadib marka lala wadaago qofkan.
- Haddii aanan joojin ogolaanshahan, inay dhaqangal ahaan doonto illaa inta aan gunnooyin ka helayo ESD.
- Inaan beddeli karo ama joojin karo wakhti kasta aniga oo wacaya **1-800-479-6151**, ama aniga oo farriin u qoraya: DCF - Qaybta Adeegyada Dhaqaale, Xarunta Ku Shaqada leh Arjiga iyo Dukumintiga, 280 State Drive
Waterbury, VT 05671-1500.

**MIYEY TAHAY IN QOFKALE NUQULLO KA HELO OGAYSIISKAAGA?** Haddii aad naga doonayso inaanu nuqullo ah ogaysiiska arjigaaga iyo gunnooyinkaaga ah u dirno qof kale, waxa aad buuxisaa oo aad gudbisaa Foomka 139AR. Tani waxa ay u qoondeynaysaa inay yihiin "Wargudbiyeyaal Kale."

**MIYEY TAHAY QOF KALE IN UU AWOOD U YEESHO IN UU HELO GUNNOOYINKAAGA?** Haddii aad doonayso qof kale in uu helo gunnooyinkaaga kaadhkaaga Wareejinta Gunnooyinka Elegtarooniga ah (EBT) si uu kaaga caawiyo in aad adeegsato, buuxi oo gudbi Foomka 139AP. Tani waxa ay u qoondeynaysaa inay yihiin "Lacag Bixiye."

*Si aad u codsato foomamka waxa aad wacdaa **1-800-479-6151**, ama waxa aad booqataa **myBenefits.vt.gov** si aad u daabacato.*
*Waxa aad isla qof u magacaabi kartaa in uu yahay Wakiilka Igman, Wargudbiye Kale, iyo Lacag Bixiye.*

**WAA INAAD SAXEEXDO ARJIGAAGA.**

ARJIYADA AAN SAXEEXNEYN LAGA MA HAWLGALI DOONO. WAA LA SOO CELIN SI LOO SAXEEXO.

*Waxa aan qirayaa, aniga oo ku mudanaya ciqaabta dhaarta beenta ah, in macluumaadka aan ku sheegay arjigani ay sax yihiin oo dhammaystiran yihiin inta ogaalkayga iyo aaminadaadayda ah, oo ay kamid yihiin macluumaadka ku saabsan xaaladda muwaadinimo iyo ajnabinimo. Waxa aad akhriyey oo aan fahmay **Xuquuqdayda & Masuuliyadahayga** ku qoran bogagga 17–18, waana aan ogolaaday.*

________________________________ Taariikhda ________________

Saxeexa Codsadaha ama Wakiilka (ka eeg qeexitaanada halka sare ee bogga)

## Shuruudaha Shaqada

Waxa aan fahansanahay in dhammaan xubnaha qoyska ee aan laga cafinin shuruudaha shaqada si otomaatig ah ayaa loogu diiwaangeliyaa shaqada waxaana suurtagal ah in laga dalbado inuu iska diiwaangeliyaan Barnaamijka Shaqada iyo Tababarka ee 3SquaresVT (3SquaresVT E&T).

## Cuntooyin Dugsi oo Bilaash ah

Haddii qoyskaagu ka helo gunnooyin bille ah 3SquaresVT oo carruurtaadu wakhti xaadiraan dhigtaan dugsiyo qayb ka ah Barnaamijka Qadada iyo Qureecda Dugsiyeed ee Qaran, waxa ay si otomaatig ah ugu qalmaan cuntooyin dugsi oo bilaash ah. Waxa aanu u diri doonaa magacyadooda Hay'adda Waxbarashada si aanu u meelmarino u qalmitaankooga adiga oo naga dalbada in aanaan sameyn mooyee. Marka aad hesho ogaysiiska deeqdaada, waxa aad sidoo kale taas usoo qaadan kartaa dugsiyada si aad caruurtaada ugu diiwaangeliso sida ugu dhakhsaha badan ee suuragalka ah. Deeqda sidoo kale waxa loo adeegsan karaa inaad carruurtaada ugu hesho cuntooyin bilaash ah haddii ay wakhti xaadiraan barnaamij tagaan barnaamijka daryeelka ilmaha oo qayb ka ah Barnaamijka Cuntada ee Daryeelka Ilmaha iyo Qofka Weyn, ama dugsiga xagaaga, naadi, ama kaam qayb ka ah Barnaamijka Adeega Cuntada ee Xagaaga. Faahfaahin dheeraad ah ayaa ku taalla bogga 18, faqradda 17 ee Xuquuqaha & Masuuliyadaha.

## Shuruudaha Federaalka ee 3SquaresVT

3SquaresVT waa waxa Vermont ugu yeedho Barnaamijka Kaalmada Nafaqada Dheeraadka ah (Supplemental Nutrition Assistance Program, SNAP) ee federaalka. Gobolku waa in uu uga hawlgalo arjiyada 3SquaresVT si waafaqsan habraacyada SNAP, oo ay kamid yihiin jadwal-wakhtiyeedyada, ogaysiiska, iyo shuruudaha dacwada cadaaliga ah, iyada oo aan la eegayn in arjiga loogu tala galay 3SquaresVT keliya ama loogu talagalay 3SquaresVT iyo barnaamijyo kale. Codsadaha loogu ma diidi karo gunnooyinka 3SquaresVT keliya iyada oo lagu sababaynayo in loo diiday gunnooyinka barnaamijyo kale. Haddii codsaduhu uu yahay hay'ad oo uu codsanayo 3SquaresVT iyo Dakhliga Kabka ah (Supplemental Security Income, SSI) isku wakhti, taariikhda xarayntu waxa ay noqon doontaa taariikhda laga soo shaacinayo hay'adda.

Xeerka Cuntada iyo Nafaqada ee 2008 (hore u ahaa Food Stamp Act), sida wax looga beddelay, 7 U.S.C. 2011-2036, waxa uu oggolaanayaa ururinta macluumaadka arjiga, oo ay kamid yihiin lambarka Sooshal Sekeyuuritiga ee xubin qoys oo kasta, si loogu adeegsado go'aaminta inaad u qalanto ama aad weli usii qalanto inaad hesho gunnooyinka 3SquaresVT. Waxa aanu ku xaqiijin doonaa macluumaadkan iyadoo la adeegsanayo barnaamijyo koombuyuutarka ah. Macluumaadkan waxa sidoo kale loo adeegsan doonaa si loogu la socdo u hoggaansanka shuruucda iyo maareynta barnaamijka.

## Bayaanka Takoor La'aanta USDA **(HA U DIRIN ARJIYADA USDA)**

Si waafaqsan sharciga xuquuqda madaniga ah ee federaalka iyo xeerarka iyo siyaasadaha xuquuqda madaniga ah ee Waaxda Beeraha ee Maraykanka (USDA), hay'addan waxa mamnuuc ka ah inay samayso takoor ku salaysan qowmiyad, midab, asalka wadanka, jinsiga (oo ay kamid yihiin aqoonsiga jinsiga iyo jihada galmada), caqiidada diimeed, naafanimo, da', aragtiyo siyaasadeed, ama aargoosi ka dhashay uloolanka xuquuqda madaniga ah.

Macluumaadka barnaamijka waxa lagu diyaarin karaa luuqado aan ahayn Ingiriisi. Shakhsiyaadka naafada ah ee u baahan qaabab kale oo xidhiidh si ay u helaan macluumaadka barnaamijka (sida farta indhoolka, far waaweyn, cod dhegaysi, Luuqadda Dhegoolka Maraykanka), waa inay la xidhiidhaan hay'adda (gobolka ama degaanka) ay ka codsadeen gunnooyinka. Shakhsiyaadka ah dhegoolka, dhegaha culus ama qaba naafanimo dhanka hadalka ah waxa ay USDA kala xidhiidhi karaan Adeegga Dadka Naafada ka ah Maqalka iyo Hadalka lambarka (800) 877-8339.

Si aad ugudbisato cabasho takooris ah barnaamij, Cawduhu waa in uu buuxiyo Foom ah AD-3027, Foomka Cabashada Takoorka ee Barnaamijka USDA oo laga heli karo onlayn ahaan barta: https://www.usda.gov/sites/default/files/documents/USDA-OASCR P-Complaint-Form-0508-0002-508-11-28-17Fax2Mail.pdf, ama uu ka heli karaa xafiis USDA ah, isaga oo wacaya*(833) 620-1071*, ama isaga oo qoraya warqad uu ku hagaajinayo USDA. Waraaqda waa inay ku xusnaato magaca, cinwaanka, lambarka taleefanka ee dacwoodaha, iyo sharraxaad qoraal ah oo ficilka takoorka ah ee la sheegtay oo si fiican oo faahfaahsan u qoran si uu u ogeysiiyo Kaaliyaha Xoghaynta Xuquuqda Madaniga ah (ASCR) waxa uu yahay iyo taariikhda uu dhacay xadgudubka xuquuqda madaniga ah ee la sheegtay. **Foomka AD-3027 ee la buuxiyey ama waraaqda waa in loo gudbiyaa:**

**Iimayl ahaan:**
*Adeegga Cuntada iyo Nafaqada, USDA*
*1320 Braddock Place, Room 334*
*Alexandria, VA 22314*; **AMA**

**Faakis ahaan:**
*(833) 256-1665*
ama
*(202) 690-7442*; **AMA**

**Iimayl ahaan:**
FNSCIVILRIGHTSCOMPLAINTS@usda.gov/

Wakaaladdanu waxay bixisaa fursad loo simanyahay. **ARJIYO HA U DIRIN USDA.**

# Xuquuqaha & Masuuliyadaha

**Waa inaad akhrido xuquuqahaaga iyo masuuliyadahaaga. Haddii aad caawimo uga baahato fahankooga, ama aad jeclaan lahayd nuqul (ku qoran far waaweyn), waxa aad wacdaa 1-800-479-6151. Waxa aad sidoo kale dib uga eegi kartaa onlayn ahaan wakhti kasta adiga oo booqanaya myBenefits.vt.gov.**

1. **Waxa aan xaq u leeyahay inaan racfaan ka qaato go'aan kasta oo aan diiddanahay.** Waxa aan codsan karaa dhegaysi caddaalad ah haddii gunnooyinku dib u dhacaan, la diido, soo afjarmaan, ama isbeddelaan. Kiiskayga waxa soo jeedin kara madaxa qoyska ama wakiil, sida qareen, qaraabo, saaxiib, ama afhayeen kale. Si aan u bilaabo hannaanka waxa aan ka wici karaa Xarunta Adeegga Gunnooyinka lambarka **1-800-479-6151**; farriin u diri karaa Guddoomiye Ku Xigeenka ESD, Department for Children and Families, HC 1 South, 280 State Drive, Waterbury, VT 05671-1020; ama waxa aan farriin u diri karaa Guddiga Adeegyada Aadanaha, 14-16 Baldwin St., Second Floor, Montpelier, VT 05633-4302.
2. **Waxa aan xaq u leeyahay nuqul ah arjigan.** Si aan u helo mid waxa aan ka wici karaa Xarunta Adeegga Gunnooyinka lambarka **1-800-479-6151**.
3. **Waxa aan xaq u leeyahay go'aan wakhtiga munaasab ku ah.** Iyada oo aad dib u dhac sababto adigu, dhakhtar, xaalad degdeg ah oo aan la fileyn, ama mushkilad maamul oo ka baxsan awoodda ESD moojee, waxa aan filan karaa go'aan muddo 30 maalmood ah gudahood oo ka bilaabmaya gudbinta arjigayga.
4. **Sharciga Maraykanka ee Dadka Laxaadka La' (The Americans with Disabilities Act, ADA) waxa uu siiyaa dadka naafada ah xuquuq gaar ah oo cayiman.** Haddii aan qabo xanuun jidheed ama maskaxeed oo si weyn u yareeya dhaqdhaqaaqyada nolosha ee muhiimka ah (sida, socodka, aragga, ama fekerka), waxa aan u qalmi karaa fudaydinada macquulka ah si la iiga caawiyo inaan ka qaybqaato barnaamijyada ESD.
5. **Macluumaadka ku saabsan arjigayga iyo gunnooyinkaygu waa qarsoodi waxaana ilaalinaya sharciga gobolka iyo federaalka.** ESD ma wadaagi karto wax macluumaad ah oo igu saabsan aniga haddii aanay si toos ah xidhiidh ula lahayn maamulka barnaamijka, uu ogol yahay sharcigau ama amar maxkamadeed, ama aan ogolaansho bixiyo moojee.
6. **Keliya muwaadiniinta Maraykanka iyo qaar ka mid ah dadka aan muwaadiniinta ahayn ayaa heli kara gunnooyinka.** Haddii qoyskayga ay ku jiraan dad aan u qalmin xaaladdooda qaxootinimo awgeed, weli waxa aan u codsan karaa xubnaha u qalma. ESD waxa ay xaqiijin doontaa xaaladda qaxootinimo ee dhammaan dadka aan muwaadiniinta ahayn ee soo codsada gunnooyinka Adeegyada Muwaadinimada iyo Qaxootiga ee Maraykanka. Uma baahni inaan bixiyo macluumaadka qaxootinimada dadka aan codsaneyn gunnooyinka, balse waa inaan ku daro macluumaadka kale, sida dakhligooga iyo khayraadkooga.
7. **Ka helitaanka gunnooyin ESD waxa ay saameyn kartaa kafaale qaadaha ama xaaladda qaxootinimo ee qofka qaxootiga ah.** Haddii tani khusayso qoyskayga, waxa aan dooran karaa inaan kala xidhiidho Gargaarka Sharciyeed ee Vermont lambarka **1-800-889-2047** wixii su'aalo sharciyeed ah kahor codsiga.
8. **Aniga ayaa masuul ka ah ka warbixinta isbeddelada.** Dhammaan wixii barnaamijyo ah marka laga reebo 3SquaresVT, waxa aan ogolahay inaan kusoo wargaliyo isbeddelada 10 maalmood gudahood oo ka bilaabma marka ay dhacaan. Barnaamijka 3SquaresVT, waa inaan kaga warbixiyo isbeddelada ka dhiga dakhliga qoyskayga heerka ama wax ka yar 130% heerka saboolnimada federaalka, marka xubin qoys saacadihiisa shaqo ee gunnooyinka wakhtigoodu-xaddidan yahay* ay ka yar yihiin 80 saacadood bishii muddo 10 maalmood ah gudahood kadib bisha isbeddelku dhaco. Si aad u helo tilmaamaha dakhliga, waxa aan booqan karaa *www.fns.usda.gov/snap/eligibility.* Si aan uga soo warbixiyo isbeddelada, waxa aan wici karaa 1-800-479-6151, ama si aan u daabacdo foomka (Foomka 200), waxa aan booqan karaa *myBenefits.vt.gov*. **Shakhsiyaadka leh gunnooyinka wakhtigoodu-xaddidan yahay waa kuwa ah da'da 18 illaa 49, ee shaqaysan kara aana laga reebin aana qaadanin gunnooyinka 3SquaresVT la siiyo qoys uu la nool yahay ilme aan qaangaadh ahayn.*
9. **Waxa aan ogolahay inaan wadaago lambarka Sooshal Sekeyuuritiga (SSN) ee qof kasta oo codsanaya.** Sharciga federaalku waxa uu waajibinayaa tan inay shardi u noqoto u qalmitaanka (42 U.S.C. §1320b-7). Barnaamijyada qaar waxa ay uga tanaasuli karaan shardigan xubno kamid ah urur diimeed diida bixinta lambarrada Sooshal Sekeyuuritiga. ESD waxa uu adeegsadaa SSNs si ay u fuliyaan kharash bixinada masruufka ilmaha, uga hortagaan shakhsiyaadku inay laba jeer qaataan gunnooyinka, u xaqiijiyaan saxnaanta iyo runsheegnimada macluumaadka la siiyey ESD, iyo wax kale oo dheeraad ah.
10. **Waxa aan ogolahay inaan ugu sheego ESD si dhakhso ah gunnooyinka aan ka helo gobol kale.** Haddii aniga ama xubin qoyskayga kamid ah ay kaalmada cuntada ama kaalmada dhaqaale ka laba qaato gobol kale, ama la igu xukumay 10 kii sano ee u dambeeyey been ka sheegista halka aan ku noolahay si aan gunnooyin uga helo wax ka badan hal gobol, waxa aan u sheegi doonaa ESD.
11. **Waxa aan ogolahay inaan u magacaabo dhammaan xuquuqahayga masruufka ilmaha ESD.** Kahor inta aan ESD aanay go'aamin u qalmitaankayga Reach Up, waa inaan buuxiyo oo aan saxeexo Foomka 137 (ogolaanshaha masruufka ilmaha) ee waalid kasta oo aan hayn ilmaha (NCP) ee dhalay ilmaha (carruurta) ku nool gurigayga. Inta aan sugayo go'aanka, waa inaan soo sheego wixii taageero ah ee NCP si toos ah ii siiso aniga. Haddii kaalmo la isiiyo, waa inaan ku wareejiyo taageeradaas Xafiiska Masruufka Ilmaha. Haddii aan aaminsanahay in raadsashada masruufku ay keeni karto in waalidka aan ilmaha haynin uu jidh ahaan ama shucuur ahaan ii dhibaateeyo aniga ama carruurta arrinkan ku jirta, waxa aan dalban karaa Foomka 137W (ka tanaasulida wada shaqaynta). Si aan u codsado foomamka, waxa aan ka wici karaa Xarunta Adeegga Gunnooyinka lambarka **1-800-479-6151**, ama waxa aan booqan karaa **myBenefits.vt.gov** si aan uga daabacdo foomam.
12. **Waxa aan ogolahay inaan la shaqeeyo ESD haddii arjigayga loo doorto si loogu sameeyo dib u eegis xakameynta tayada ah.** Tan waxa kamid ah bixinta caddeynta wixii macluumaad ah ee loo baahan yahay iyo u ogolaanshaha ESD inay hesho caddeyntaas haddii aanan awood u lahayn inaan bixiyo.

13. **Haddii aan helo kaalmo shidaal, waxa aan ogolahay inaan aqbalo adeegyada cimileynta oo bilaash ah.** Waxa aan sidoo kale siinayaa ESD ogolaansho ah inay hesho oo ay wadaagto wixii xog ah ee ku saabsan isticmaalka, kharashka, xogta adeegsiga, kharashyada adeegyada guriga, taariikhda kharash bixinta ee tamartayda ee sanadkii iyo macluumaadka akown ee kale ee shirkadayda ama shirkadahayga kulaylinta iyo tamarta ee koowaad iyo/ama labaad. Waxa aan u ogolahay shirkadda ama shirkadaha inay siiyaan macluumaadkan ESD.

14. **Waxa aan u ogolahay Guddoomiyaha Cashuuraha ee Vermont in uu siiyo macluumaadka cashuur celintayda dakhli ee gobolka Guddoomiyaha Waaxda Carruurta iyo Qoysaska, ama wakiilkiisa ama wakiilkeeda. (33 V.S.A. §112 (c))**

15. **Waxa aan fahansanahay in dhammaan xubnaha qoyska ee aan laga cafin shuruudaha shaqada si otomaatig ah loogu diiwaangeliyo shaqada oo laga dalban karo inay iska diiwaangeliyaan Barnaamijka Shaqada iyo Tababarka ee 3SquaresVT (3SquaresVT E&T).**

16. **Waxa aan ogolahay in dadka qaangaadhka ah ee kamid ah qoyskayga inay kala shaqayn doonaan maareeyaha kiiskayaga ka gudbitaanka caqabadaha, sahaminta fursadaha, koruqaadista dhaqaalahayaga iyo gaadhitaanka yoolashayada. Haddii aanu ka qayb qaadan weyno shuruudaha Adeegyada Reach Up, anaga oo aan haysan sabab macquul ah, gunadayada dhaqaale waa la dhimi doonaa. Waxa aanu sidoo kale ogolnahay inaanaan ku kharash gareyn ama kala bixin kaashka Reach Up dukaanada khamriga, baararka, kalaabyada naaguhu ka jaasaan, kasiinooyinka ama xarumaha ciyaaraha ee kale.**

17. **Waxa aan fahansanahay in haddii qoyskaygu helo gunno 3SquaresVT oo bille ah, magacyada carruurtayda loo diri doono Hay'adda Waxbarashada si ay u xaqiijiso u qalmitaankooga cunnooyinka dugsiga ee bilaashka ah.** Hadii aanan dooneyn magaca ilmahayga in loo diro dugsiga, waa inaan Xarunta Adeegga Gunnooyinka uga wacaa si dhakhso ah lambarka **1-800-479-6151**. Waxa aan beddeli karaa go'aankayga hadhaw oo waxa aan arji qado dugsiga ah ku buuxin doonaa dugsiga.

18. **Waxa aan fahansanahay macluumaadka aan ku bixiyo arjigan in la marin karo xaqiijin ay sameeyaan madax ah heer federaal, gobol, iyo degmeed, iyo inaan masuul ka ahay saxnaanteeda.** Tan waxa kamid ah macluumaadka ku saabsan xaaskayga ama lammaanaha aanu wada noolnahay, carruurtayda, iyo xubnaha kale ee kamid ah qoyskayga. Waxa aad u ogolaatay ESD inay la xidhiidho loo shaqeeye(yaasha) si ay u xaqiijiso macluumaadka shaqada iyo dakhliga iyada oo ujeedku yahay go'aaminta u qalmitaanka gunnooyinka ee qoyskayga. Haddii aanan doonayn ESD inay la xidhiidho loo shaqeeye(yaasha), waa inaan ka wacaa Xarunta Adeegga Gunnooyinka si dhakhso ah lambarka 1-800-479-6151. Macluumaadka lagu heli karo Nidaamka Xaqiijinta Dakhliga iyo U Qalanka (Income and Eligibility Verification System, IEVS) waa la codsan doonaa, la adeegsan doona waxaana laga xaqiijin doonaa dhinacyo saddexaad marka ESD ay aragto qaladaad. Haddii macluumaadka aad bixiyay aanu sax ahayn, gunnooyinka waa layga yareyn karaa, waxa layga dalban karaa inaad dib u bixiyo gunnooyinka, waxa la ii diidi karaa gunnooyinka, waxaana la imarin karaa dacwad dhagaysi ah oo uqalmitaankaaga lagu joojinayo oo maamul iyo maxkamadeyn faldembiyeed.

19. **WAA IN AANAN been ka sheegin ama qarin macluumaad si aan ugu helo gunnooyin qoyskaygu aanay ahayn inay helaan.** Waxa aan fahansanahay inay tahay *khiyaano* haddii aniga ama qof qaangaadh ah oo kale oo kamid ah qoyskayga si kas ah, ama ka leh ujeed guud ama gaar ah, ubixiyo macluumaad been ah ama marin habaabin ah, si aan ugu helo, isugu dayo inaan ku helo, ama qofkale ka caawiyo in uu helo Reach Up, 3SquaresVT, Kaalmada Shidaal, ama Qofka Aasaasiga ah.

20. **WAA IN AANAN si khaldan u adeegsan kaadhadhka 3SquaresVT/EBT.** Waxa aan fahansanahay in haddii si khaldan loogu adeegsado kaadhadhka 3SquaresVT/EBT qaababka soo socda loo tixgelinayo inay tahay *ganacsi sharci darro ah:*

- **WAA IN AANAN** iibin 3SquaresVT kayga.
- **WAA IN AANAN**ku beddelan ama aanan u adeegsan 3SquaresVT inaan ku iibsado walxo aan cunto ahayn, khamri, waxyaabaha ka samaysan tubaakada, daroogooyinka sharci darrada ah, qoryo, rasaas, ama walxaha qarxa.
- **WAA IN AANAN** u ogolaan qof in uu u adeegsado kaadhkayga EBT ga, wax aan ka ahayn in uu qoskayga ugu soo iibiyo cunto.
- Haddii aan cunto ku iibsanayo dayn, **WAA IN AANAN** u adeegsan 3SquaresVT inaan ku bixiyo deyntaas, xattaa haddii kharashka la igu soo dallacay yahay ka cuntada oo keliya.
- **WAA IN AANAN** adeegsan ama aanan haysan kaadh(adhka) EBT-ga qofkale, aniga oo cunto ugu iibinaya qoyskiisa mooyee.

21. **Waxa aan fahansannahay in aniga ama qof kale oo weyn oo qoyskayga kamid ah lagu furi karo baadhitaan khiyaano, ganacsi sharci darro ah, ama labadaba oo aan mari kartno dacwad dhagaysi ah oo uqalmitaankaaga lagu joojinayo oo maamul iyo/ama maxkamadeyn faldembiyeed.** Waxa aan fahansahay in haddii aniga ama qof weyn oo kale oo kamid ah qoyskayga lagu helo dembi ah khiyaanada Reach Up, 3SquaresVT, Kaalmada Shidaalka, ama Qofka Aasaasiga ah maxkamed dhexdeed, ciqaabtu inay noqon karto **illaa saddex sano oo jeel ah iyo ganaax lacageed oo ah illaa $1000**. Waxa sidoo kale suuragal ah in la igu soo rogo ganaax lacageed oo ah **illaa $250,000, aan muto xadhig ah illaa 20 sano, ama labadaba**, haddii la igu helo dembi ah ganacsi sharci darro ah oo ah 3SquaresVT maxkamad dhexdeed. Waxa aan fahansanahay in haddii aniga ama qof weyn oo kamid ah qoyskayga ay ku hesho dembi ah khiyaanada ama ganacsiga sharci darrada ah ee 3SquaresVT hay'ad maamul ama maxkamad midkood, xanibaadda 3SquaresVT waxa ay noqon doontaa **hal sano xadgudubka koowaad, laba sano ka labaad, marka saddexaadna gabi ahaanba waa lagaa joojin doonaa**. Haddii aniga ama qof weyn oo kamid ah qoyskayga lagu helo dembi ah ku beddelashada ama ku iibsiga daroogooyin sharci darro ah 3SquaresVT, xanibaaddu waa **laba sano xadgudubka koowaad marka labaadna gabi ahaanba waa lagaa joojin doonaa**. Haddii aan gunnooyin cunto ka helo laba gobol isku wakhti, xannibaaddu waa **10 sano**. Waxa aan fahansanahay in haddii aniga ama qof weyn oo qoyskayga kamid ah lagu helo dembi ah dhacdo ganacsi sharci darro ah oo ka badan $500 ama ku beddelashada qoryo, rasaas, ama walxaha qarxa 3SquaresVT, xanibaaddu waa **mid abid ah**. Sida ay dhigayaan Xeerka Cuntada iyo Nafaqada ee 2008, 7 C.F.R Qaybta 273.16b, 42 U.S.C Qaybaha 1320a-7b iyo 33 V.S.A Qaybaha 141, 143 kuwan iyo ciqaabaha federaalka iyo gobolka ayaa sidoo kale habboonaan kara.

22. **Waxa aan qirayaa in qof kamid ah qoyskaygu aanu baxsad ka ahayn maxkamadeyn.** Tan waxa kamid ah xadhig lagu mutay faldembiyeed weyn ama isku deyidda geysashada faldembiyeed weyn, ama jebinta shardi baroobeeshin ama sii deynta shardiga leh oo hoos yimaadda sharciga federaalka iyo gobolka. Waxa aanu fahansanahay in ESD ay tahay inay macluumaad siiso hay'adaha bilayska si ay u xidhaan dembiilayaasha baxsadka ah.